

LIISKA SUGITAANKA EE BAKHTIYAANA EE FURMAYA

 **Janaayo 10 - Febraayo 10, 2022**

 **Barnaamijka Doorshada Kaarka Guriyaynta**

Magaalada Boise Maamulka Guriyeynta Ada (BCACHA) waxay aqbali doonaan codsiyada horudhaca ah ee meelaynta suurtagalka ah ee liiska sugitaanka ee Doorashada Guriyaynta laga bilaabo Janaayo 10, 2022.

Waa maxay Barnaamijka Doorashada Kaarka Guriyaynta?

Kaarka Doorashada Guriyaynta (sidoo kale loo yaqaan Qaybta 8) waa barnaamij guriyaynta la kabka ah oo ay maamusho maamulada guriyaynta deegaanka oo ay maalgeliso Waaxda Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Maraykanka. Barnaamijka waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo qoysaska xaqa u leh in ay kiraystaan guryo ammaan ah oo la awoodi karo iyaga oo bixinaya qaar ama dhammaan kharashaadkooda ijaarka.

Miyaan U Qalma?

Helitaanka maalgelinta xaddidan awgeed, BCACHA waxay kaliya u furi doontaa bakhtiyaanasiibka liiska sugitaanka codsadyaasha hore ee buuxiya dhammaan shahaadooyinkan soo socda:

- 1 Madaxa Qoysku waa in uu ka weyn yahay 18 sano; IYO
- 2 Reerku waa inuu u qalma inuu yahay qof dakhligoodu yar yahay; IYO
- 3 Qoyska waa in uu u qalma doorbida daganaanshaha Idaho (qoyska ayaa u qalma haddii qoysku ku nool yahay, shaqeeyo, ama loo shaqaaleysiiyay inuu ka shaqeeyo gobolka Idaho); IYO
- 4 Waa inuu buuxiyaa ugu yaraan mid ka mid ah shuruudaga soo socda:
 - Madaxa qoyska, hogaamiyaha ama xaaskaagu waa in uu ahaadaa da'da 62 ama ka weyn; ama
 - Madaxa qoyska, hogaamiyaha ama xaaskaagu waa curyaan; ama
 - Qoysaska leh carruur da'doodu ka yar tahay 18 jir



Sidee ayaan u Dalbadaa?

Ku soo gudbi codsigaaga hordhaca onlaynka www.bcacha.org inta u dhaxaysa Janaayo 10 iyo Febraayo 10, 2022.

Codsiyada xaqa u leh ayaa la gelin doonaa bakhtiyaanasiibka halkaas oo 2,500 qoys kaliya si aan kala sooc lahayn loo dooran doono laguna dari doono liiska sugitaanka.

**Wixii macluumaad
dheeraad ah, fadlan
booqo www.bcacha.org
ama wac 208-345-4907.**

Haddii codsaduho uu naafo yahay oo u baahan yahay hoy macquul ah, ama ay qabaan duruufo ka hor istaagaya inay internetka ka codsadaan, fadlan kala xidhiidh xafiiskayaga (208) 345-4907.

Waa xeerka BCACHA inay aragto qof kasta iyadoon loo eegayn jinsiyad, diin, midab, jinsi, lab iyo dhedig, aqoonsiga, asalka wadanka dhalasho, nooca galmoodka, heerka qoyska, ama naafanimada ayaa heli doona fursad siman helitaanka guri la awoodo qimihiisa.